# SHARAFTA KHATAR QAADASHADA

Khatar qaadashada waa qayb wayn oo ka mid ah nolosha. Laga soo bilaabo ku boodista geeska qotoda dheer iyo ciyaarista mashiinka gacanka (claw machine) ilaa go'aamada maalinlaha ah ee ku saabsan halka aad ku nooshahay, sida aad u kharashgarayso lacagtaada, iyo cidda aad la leedahay xiriirka, khataruhu waxay had iyo jeer ka yihiin qayb. Balse kawaran haddii aan laguu oggolayn inaad qaadato khatar? Haddii qofkale uu kuu samaynayo go'aan kasta? Adiga oo aan talo ku lahayn? Taasi waa xaqiiqada dad badan oo qaba naafooyin.

Taasi waa halka **Sharafta Khatar Qaadashada** ay soo galayso. Waa fikrad fudud: qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu gaaro go'aamadiisa. Xitaa haddii doorashooyinkaas ay leeyihiin cawaaqib xun. Guuldarraysiga, dhicista, iyo luminta waa dhammaan khibradaha naga caawiya inaan korno. Marka qof kale uu adiga kuu gaaro go'aan kasta si uu kuu ilaaliyo, kaliya ma qaataan un doorasho. Waxay qaataan fursad lagu noqdo mid aad u madax-bannaan laguna noolaado nolol aayo ka tashi leh. Waana in fursadaas aan laga xaqirin qofna.

Waxbadan ka ogow halkan ama booqo
**TreatPeopleLikePeople.org**